

A.F.I.S.

XEER 20 disembar 1956, L. 123 rep.

Asaasidda "Agaasinka Dugsiyada hoose/dhexe ee Talyaani ee Soomaaliya"

MAAMULUHU

Marki uu arkay sharciga Jamhuuriyadda Talyaaniga 4 Noofambar 1951, n. 1301, kaas oo ansaxiya isla markaana dhaqan gelinaya heshiiska badbaadinta ee dhulka Soomaaliya, iyo xeerarka muddada gaaban;

Marki uu arkay wareegtada 18 Maajo 1956, n. 79: "Hay'adaha Xafiisyada Gaarka ah ee MTMS."

Marki uu arkay wareegtada 16 Nobeembar 1956, n. 108 ee asaasida Xafiiska Arimaha Talyaaniga:

Marki uu Tixgeliyey fursadda ah in la hubiyo kala soocidda sharciga-maamul ee Dugsiyada hoose/dhexe ee Talyaaniga ee Soomaaliya, oo hadda ku mideysan Kormerka waxbarashada Dugsiyada Hoose/Dhexe;

Kadib soo Jeedinta Madaxa Xafiiska Arimaha Bulshada ee Gaarka ah, isaga oo la tashanaya Madaxa Xafiiska u gaarka ah Arimaha guud bulshada;

Marki uu Dhageystay Guddiga Maamulka;

WUXUU XEEREYAY:

Qod. 1

Laga bilaabo janaayo 1, 1957, "Agaasinka Dugsiyada Hoose/dhexe ee Talyaani ee Soomaaliya" ayaa la asaasay iyada oo loo xilsaaray Xafiiska Arimaha Talyaaniga.

Qod. 2

Maamulaha Dugsiyada Hoose/Dhexe ee talayaaniga waxa magacaabaya Maareeyaha.

Muqdisho, 20 disembar 1956.

MAAREEYE

P. Franca

ARKAY n. 177 ee 27ki disembar 1956.

Madaxa xisaabaadka: **Tura**

ARKAY Diiwaangelinta – Diiwaan n. 21- warqad. N. 124.

Muqadisho, 29 disembar 1956.

Garsooraha Xisaabaadka: **Spadaro**
